# Ka qaybgalka haweenka Soomaaliyeed ee arrimaha bulshada iyo siyaasadda

## Qodobbada ugu muhiimsan:

- Haweenka Soomaalida inta badan waxaa loo soo qaataa in ay yihiin dhibbanayaal la kulma gudniinka, la faraxumeeyo, ayna diloodeen macaluusha iyo dagaalka. Inkastoo ay tahay in aan indhaha laga laaban caddaalad darrada lagu sameeyay, haddana waxaa muhiim ah inaan iftiiminno in haweenka Soomaalidu aysan ahayn kuwo aan saamayn ku lahayn nolosha. Waayo, sooyaalka taariikhda waxaa laga dheehan karaa xog tilmaamaysa haween magac iyo macne weyn lahaa.

- Doorka haweenka Soomaaliyeed uga jiraan horumarka bulshada waxa ay ka muuqdaan dhinacyo badan, ha noqoto qoyska, bulshada rayidka ah iyo dhinaca ganacsiga. Si aan u soo bandhigno khibradda badan oo ay haweenku u leeyihiin ka qaybqaadashada arrimaha bulshada iyo siyaasadda marka laga hadlayo taariikhda dhow ee Soomaaliya, waxaa lagama maarmaan ah in arrinta laga eego meelo dhaafsiisan meelaha inta badan wax laga eego ee awoodda siyaasadeed iyo saamaynta laguna daro haweenka keena isbeddelka qeybaha kale.

- Haweenka Soomaaliyeed siyaabo kala duwan ayay u arkaan doorka ay ku dhex leeyihiin bulshada maanta iyo dadaaladooda ka qaybqaadashada arrimaha bulshada. Isbadallada bulsho iyo kuwa siyaasadeed ee waaweyn iyo arrimaha shakhsi ahaan iyaga u saameeyey (sida dhacdooyinka naxdinta lahaa) ayaa qaabeeyay sida ay isku arkaan haweenka Soomaaliyeed ee ka qaybgalkooda arrimaha bulshada. Wareysiyada aan la yeelanay haweenka ayaa muujinaya in ay siyaabo kala duwan isku arkaan (sida qabiilka, deegaanka ay ka joogaan dhulka Soomaalida, khibradaha qurbo-joogta, inay hooyo tahay, iwm.) marka ay ka qaybqaadanaayaan arrimaha bulshada iyaga oo ka shidaal qaadanaya ama dugsanaya taariikhdooda shakhsi ahaaneed, xiriirradooda iyo ilahooda dhaqaale.

- Haweenka Soomaalidu waxay u wajahaan ka qayb qaadashada arrimaha bulshada iyo tan siyaasadeedba iyaga oo ka duulaya arragtiyo kala duwan iyo cabbiraad kala duwan oo salka ku haya fahamyo kala duwan oo ay ka qabaan wixii dulmi ama duudsin ah iyo qorshayaasha ugu wanaagsan ee horumarinta iyo awoodsiinta bulshada. Tusaale ahaan, haweenka qaarkood ayaa laga yaabaa inay u ole-oleeyaan ballaarinta xuquuqda caruurta iyaga oo dadaalkoodu ka imaanayo kaaliintooda hooyonnimo, halka kuwo kalana ay dhacdo inay doortaan sidii ay ugu dhaqdhaqaaqi lahaayeen xuquuqda qabaa'ilka laga tirada badanyahay maadaama ay dhici karto in iyagu ay xubin ka yihiin dad la duudsiyo. Haweenka Soomaaliyeed waxay leeyihiin haybo ka badan in ay haween uun yihiin. Ma ahan in haweenka oo dhan ay ahmiyad siiyaan uddoodidda xuquuqda siyaasadeed ee haweenka ama hadafka ugu mihiimsan ee ay tahay in ay u hawl galaan. In la fahmo badnaanta iyo baaxadda kala duwananshaha aragtida haweenka Soomaaliyeed, khibradooda iyo noocyada ka qaybqaadashadooda ayaa shardi u ah dood kasta ama qorshe siyaasadeed kasta oo ku saabsan doorka aweenka gobolka Soomaalida.

- Qoridda iyo soo bandhigidda sheekooyinka ayaa kamid ah hababka ka qaybqaadashada bulsho iyo tan siyaasadeed ee raga iyo haweenkaba. Taariikhda gobolka Soomaalida waxa ay inta badan xoogga sartaa raga sidaa darteed jiilal kala duwan ee haweenka ayaa qora, oo dib u aruurin ku sameeya khibradahooda si ay u muujiyaan meelna u saaraan ka saarista ama xusid la'aanta taariikhda looga sameeyay. Qoritaanka ay haweenku taariikhda qalinka u qateenna waxaa ka dhashay in haweenka codkooda la maqlo. Haweenkuna waxay qoraalkooda u isticmaalaan in ay ku soo bandhigaan aragtiyahooda iyo xalka arrimaha sida barakaca, dib u heshiisiinta, waxbarashada, deegaanka, xagjirnimada, iwm.

**Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda** waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay

## Raad-raac:

Dadaallada caalamiga ah iyo kuwa gobolka ee lagu kordhinayo ka qayb galka saamaynta leh ee haweenku kaga qayb qaadanayaan dhismaha nabadda, dib u dhiska iyo horumarinta bulshooyinka, ayaa xawaare ku socday labaatankii sano ee u dambaysay. Sannadkii 2000, Qaramada Midoobay ayaa soo saartay qaraar UNSCR 1325, kaasoo si rasmi ah loogu wajahayo baahida loo qabo in wax laga badalo ka reebista haweenka laga reebay ka qaybqaadashada hannaanka nabadda. Qaraarka UNSCR 1325 wuxuu qirayaa kaalinta muhiimka ah ee haweenku ay tahay ama laga rabo inay ka qaataan yarraynta colaadaha iyo adkaynta nabadda. Sidoo kalana Midowga Afrika ayaa u asteeyey sannadka 2015 in uu yahay "Sannadkii Awoodsiinta Haweenka iyo Horumarka", sidaa darteed waxaa lagu celceliyay muhiimadda ay leedahay in haweenka ay dad matala ku yeeshaan wadahadallada iyo hannaannada kale ee siyaasadeedba — ilaa heer qaran iyo mid goboleedba ee qaaradda Afrika. Si kasta ha noqotee, heer qaran (iyo heerka kasii hooseeyaba) hirgalinta iyo u hawl-galka qaraarrada iyo baaqyada caalamiga ah ayaa waxaa cadaatay inay yihiin kuwo ay adkaatay fulintoodu.

Dadaallo ay haweenka Soomaalidu hoos ka soo bilaabeen ayaa laga yaabaa inay gaareen qaar kamid ah hadafyadii lagu dhigay qaraarrada caalamiga ah iyo kuwa goboleedba sida kuwa kor ku xusan. Xusidda taariikhda qotada-dheer ee haweenka ayaa ah mid miisaamaysa doodda ah in haweenka Soomaalidu ay ahaayeen kuwa ka maqan doodahaas. Dhab-ahaantii, haweenka Soomaalida taariikh ahaan waxay ahaayeen kuwo loo tiriyo inay kaalin muhiim ah ku lahaayeen hannaanka qaranka lagu dhisayay iyo horumarka — ka hor iyo kaddibba burburkii dawladdii Soomaaliya sannadkii 1991.

## Mashruuca Kaalinta Haweenka ee Siyaasadda Soomaaliya:

Galaangalka iyo Saamaynta Kaddib xaaladihii Colaaddeed oo loo soo gaabiyo GENSOM, waa cilmibaaris qaadanaysa labo sano oo ay iska kaashanayaan Peace Research Institute Oslo (PRIO) iyo Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda (HIPS) kaa oo sahaminaya ka qaybqaadashada haweenka Soomaaliyeed ee arrimaha bulshada iyo siyaasadda ee wakhtigii tagay iyo wakhtiga taagan.

Daraasadda waxaa maalgeliyay Golaha Cilmibaarista Norway. Waxa ayna daraasaddu weydiineysaa sida haweenka Soomaaliyeed u qeexeen guulaha taariikheed oo ay gaareen waxa ayna sahmineysaa waxa awoodda u siiyay ama dhiirigeliyay guushooda, iyo waxyaabaha caqabadda ku noqday.

Ilaa hadda, in ka badan 36 waraysi ayaa laga sameeyay Hargeisa, Galkacyo, Garowe iyo sidoo kale goobaha ay ku noolyihiin qurbo-joogta, oo ay kamid yihiin magaalooyinka Toronto, London, Oslo, Nairobi iyo magaalooyin ku yaalla Maraykanka.

Maanta, haweenka Soomaalidu waxay si waxtar leh uga qaybgaleen horumarka bulshada iyagoo ku dabbaqaya aqoontooda, xirfaddooda iyo hantidooda wax ku oolka ah iyagoo adeegsanaya hannaan siyaasadeed oo rasmi ah iyo mid aan rasmi ahaynba. Hubaashii, dareenkooda ku aaddan masuuliyad iska saarista bulshada iyo qoyska wuxuu ahaa mid si xoog leh dhiirigalin ugu ah ka qayb qaadashada arrimaha bulshada ee gudaha Soomaaliya iyo dibadda labadaba.

Inkasta oo haweenka Soomaaliyeed ay lahaayeen taariikh dheer oo noocyo badan taas oo ku saabsan dhaq-dhaqaaqooda ku aaddan ka qaybgalka arrimaha bulshada iyo kuwa siyaasaddaba, haddana, haweenku waxay ahaayeen kuwo aan ka dhex muuqan taariikhda rasmiga ah iyo taariikhda qoran ee gobolka. Doodaha qaran ee haatan socda iyo kuwa heer caalami kuwaas oo ku saabsan Soomaaliya siyaasaddeeda iyo dhaqaalaheeda wakhtiga taagan iyo mustaqbalkaba ayaa sidoo kale si ballaaran loo hareer-maraa ka qaybgalka haweenka ee arrimaha bulshada iyo kuwo siyaasaddaba. Tan ayaana munaasab ka dhigaysa wakhti ahaan iyo muhiimad ahaanba in dood xooggan laga yeesho kaalinta haweenka iyo ka qaybgalkooda arrimaha bulshada.

Warbixintan kooban waxay soo bandhigaysaa qaababka ay haweenka Soomaaliyeed isugu dayeen sidii wax looga qaban lahaa ka reebista haweenka laga reebay xusidda taariikhda, iyo sababta qoritaanku uu ugu yahay tab muhiim ah si ay ugu hawl galaan ka qayb qaadashada arrimaha bulshada iyo siyaasadda iyo xal u helidda quursiga iyo fursad-u-diidka haweenka.

Waxaan kaloo soo gudbinnay siyaabo badan oo haweenka Soomaaliyeed ku qeexaan kuna meelmariyaan ka qaybgalka arrimaha bulshada iyo siyaasadda. Markii laga hadlayo kaalinta haweenka Soomaaliyeed ee bulshada iyo markii laga hadlayo sida ay u hawl-galaan waxaan tilmaannay in maanka lagu hayo in haweenka ay noocyo badan yihiin.

Muuqaalka siyaasadda xilligan, ka qaybgalka haweenka Soomaaliyeed ee kaalinta go'aan lahaanta – heerka siyaasadeed ee Federaal iyo midka dawladaha hoose – waa mid xaddidan. Sidaas oo ay tahayna guud ahaanba dalka haweenku waxa ay ka yihiin kuwo soo saara nolol maalmeedka qoysaskooda, waxayna ku badan yihiin xarumaha waxbarashada sare ee dalka, ganacsiyada rasmiga ah iyo kuwo aan ahaynba iyo hay'adaha aan dawliga ahayn (NGOs). Waxaa ah arrin is-diiddan mataaladdooda dawladda heerarkeeda kala duwan taasoo wali aan ahayn mid u dhiganta ka qaybgalkooda iyo waxtarkooda bulshada.

### Mashruuca GENSOM

Waxaan filaynaa inaan soo gudbinno faham isu dheellitiran oo ku saabsan haweenka gobolka Soomaalida, wakhtiga tagay iyo kan taaganba. Ujeeddada laga leeyahay mashruuca GENSOM waa:

- In la ballaariyo falanqaynta ku saabsan ka qaybgalka bulsho iyo midka siyaasadeed ee haweenka Soomaalida marka la qorayo iyo marka la sheegayo taariikhaha Soomaalida.
- In aan sharaxno sida ka qaybgalka haweenka ee bulsho iyo siyaasadeedba uu isula beddelay wakhtiyada.
- In aan iftiiminno sida ay haweenku siyaabo kala duwan uga qaybqalaan, ugana qaybqaataan arrimaha bulshada.
- In aan soo gudbinno kala duwanaanshaha khibradaha haweenka ee la xiriira ka qaybgalka bulsho iyo midka siyaasadeed.

## Qoraalka iyo sheeko sheegidda

***"Hadii haweeney ay qorto wixii maskaxdeeda ku jira, dadku waxay ogaanayaan sida haweenku u fakaraan, waxayna qaddarinayaan"*** – qoraa jirta labaatameeyo oo joogta Soomaaliland ayaa sidaas tiri.

Haweenka Soomaalidu waxay leeyihiin dhaqan soo jireen ah oo ah isticmaalka gabayada oraahda ah iyo sheeko sheegid ay u isticmaali jireen inay ku soo gudbiyaan cilmi, dhacdooyinka dhacay iyo aruurinta xasuusta. Qoraalka iyo sheeko sheegidda ayaa marka laga eego dhinacyo kala duwan waxaa lagu sifayn karaa inay qayb ka yihiin ka hawl galka arrimaha bulshada iyo siyaasadda.

Ugu horreyn, haweenka Soomaalidu waxay wax u qoraan si ay u xaqiijiyaan in ka qaybqaadashadooda arrimaha bulshadu ay noqoto qayb ka mid ah tixraaca taariikhda la qoray ee gobolka. Jiilalka waaweyn, gaar ahaan, ayaa dareensan in guulahoodii (iyo kuwii haweenka kale) inaanba lagu xusin taariikhaha Soomaalida.

Jiilka da'yarta ah ee haweenka Soomaaliyeed waxa ay u tixgeliyaan kooxihii ugu horreeyay ee haweenkii ka qalin jebiyay jaamacadaha Soomaaliya ee sannadihii 1960-yadii iyo 1970-yadii in ay hormuud u ahaayeen ka qaybgalkooduna uu ahaa mid wax wayn taray horumarka qaranka. Haweenku waxay ahaayeen kuwo ka shaqaynayay shaqooyinka qaranka iyo dawladda, waxbarashada iyo caafimaadka. Waxaa kaloo in la xuso mudan in haweenka fannaaniinta ahaa ay wax ka tareen horumarinta dhaqanka Soomaalida.

Maanta, qaar kamid ah haweenkani waxay ku aruuriyaan khibradahooda iyagoo qoraya xusuus qorro, gabayo, heeso iyo buugaag iyo sidoo kale sheekooyin aan matalaad ahayn ee ku salaysan dhacdooyin taariikh ah. Inay codkooda kaga qaybqaataan arrimaha taariikhda iyo dhaqanka, ayay sii wadaan si ay bulsho ahaan iyo siyasad ahaanb u noqdaan kuwo firfircoon ama waxqabad leh.

***"Waxaan bilaabay inaan wax qoro, sababtoo ah waxaan rabay inaan dhacdooyin u duubo jiilasha mustaqbalka. Ujeedkaygu waa inaan wax ka tago"*** – Xildhibaanad ka tirsan baarlamaanka oo sannad lixdamaad ku jirta, Muqdisho.

Marka labaad, qoraalka ayaa buuxiya rabitaan muhiim ah oo haweenku doonayaan in codkooda la maqlo. Haweenka qaar dareemaya inay hayaan farriimo muhiim ah oo ay soo jeediyaan ayaa isticmaala qoraalka si ay ugu soo gudbiyaan aragtidooda iyo fikradahooda akhristayaasha gudaha iyo dibadda deegaannada Soomaalida. Haweenka ayaa wax ku qoraya luqado kala duwan (oo ay kamid yihiin Soomaaliga, Ingiriiska iyo Carabiga) oo ay uga hadlaan mawduucyo loo arko inay muhiim u yihiin horumarkooda iyo horumarka bulshadooda. Waxaana kamid ah: waxbarashada, barakaca, hooyonnimada, deegaanka iyo dhibaatooyinka uu qaadku u gaysto bulshada. Iyagoo qoraya ayay kusoo bandhigaan halka ay ka taaganyihiin arrimahaas oo kale, haweenkaasu markaas waxay muujinayaan muhiimadooda dhan bulsho iyo dhan siyaasadeedba.

***"Waxaan marwaliba sheegnaa kuwa guusha ka gaara nolosha ee ragga ah dhaqan ahaan. Taariikhdeennu waa mid aad ragga diiradda loogu saaro. Waxba kama maqalno sheekooyinka geesiyadii [haweenka], sababtoo ah hoos ayaa loo dhigaa amaba waa la yaraystaa"*** - ayay tiri siyaasiyad 50-meeyo jirta oo Garoowe, Puntland joogta.

Dhammaan deegaannada Soomaalida gabdhaha qoraaga ah waxaa loo arkaa inay yihiin haldoor ku dayasho mudan kuwaasoo ay ku daydaan jiilal badan oo haween iyo ragba leh si ay uga qaybqaataan arrimaha bulshada iyo siyaasadda. Haweenka qaar ayaa wax u qora si aysan u lumin taariikhda shaqadooda iyo halgankood, ayna uga faa'iidaystaan jiilasha Soomaalida ah ee mustaqbalka. Qaar kale ayaa iyaguna wax u qora si ay ugu daydaan haweenku oo ay markaas raacdaan himilooyinkooda iyo inay ku dhiirigaliyaan sidii ay u noqon lahayeen kuwo ku firfircoon bulshada dhexdeeda. Tusaalayaalkan oo dhan marka la eego, ficilka qoritaanku waa mid siyaasadeed, waana tusaalaha koowaad ee ka qaybgalka arrimaha bulshada.

## Kala duwanaashaha aragtiyada haweenka

***"Waxaa laga yaaabaa inaad u qaadato in xaaladda Soomaaliya ay ku adagtahay haweenka hadda. Laakiin caqligii ahaa in wiilasha loo eexdo wuu sii dhammaanayaa. Dagaalkii sokeeye kaddib, waalidiintii ayaa ogaaday in haweenku ay kaalin muhiim ah ka ciyaareen taageerada qoysaskooda. Waxa sare u kacay gabdhaha aadaya iskuullada iyo kuwa ka qalinjabinaya jaamacadaha Muqdisho marka loo eego xilliyadii lasoo dhaafay."*** - Mid kamid ah ah haweenka u dhaqdhaqaaqa arrimaha bulshada rayidka ah oo jirta 70-meeyo, Muqdisho.

Waxaa jira kala duwanaansho wayn oo u dhexeeysa sida ay haweenka Soomaaliyeed u arkaan doorka ay bulshada ku dhex leeyihiin. Waxaa arrinka laga dhadhansan karaa aragtiyahooda sida ay u arkaan in dumarka Soomaalida ay maanta heli karaan fursad ka badan wixii ka horreeyay inta aysan dhicin dawladdii Soomaaliya sannadkii 1991. Booska ay kaga jiraan bulshada iyo khibradda nololeed ee haweenka ayaa ka muuqata fikradahooda dooddan.

Labo aragti ayaa kasoo baxay mawduucan. Haweenka qaar ayaa xasuusta wixii ka horreeyay marxaladdii burburka 1991 inay ahayd xilligii dahabiga u ahaa marka laga hadlayo horumarka haweenka iyo guulahooda. Waxay ku doodaan in haweenku ay lahaayeen xuquuq sharciyeed badan, lana siiyay fursado ay wax ku bartaan kuna shaqaystaan, taasoo fududaysay ka qayb qaadashadooda arrimaha bulshada. Dadka aragtidaas qaba ayaa aaminsan in haweenka Soomaalidu ay bulaaleen sannadihii 1970-eeyadii iyo 1980-eeyadii. Iyagoo wayneynaya meelmarintii sharcigii aadka la isugu qabsaday ee qoyska ee sannadkii 1975, kaasoo, ay ku doodaan in uu ahaa sharci muhiim ah oo ballaariyay xuquuqda sinnaansho ee haweenka sida dhaxalka iyo diyada. Xeerka qoyska waxa uu sidoo kale haweenka siiyay awood ay ugu doodaan xuquuqo kale.

Qaar kale ayaa soo jeediyay in haweenku ay maanta ka fursado badan yihiin marka loo eego taariikhihii hore ee Soomaaliya soo martay. Calamaadaha horumarkaas waxaa kamid ah, koritaanka ku yimid tirada gabdhaha aada iskuullada iyo sare u kaca gabdhaha dhigta jaamacadaha ku yaalla gobolka. Qaar ayaa aaminsan inkasta oo ay jiraan tiro badan oo caqabada ah, in haweenka Soomaalidu ay haleen fursado dhanka nolosha ah oo badan. Dagaalkii sokeeye iyo khibradihii laga dhaxlay noloshii qurbaha ayaa baddashay dhaqan ahaan shaqadii, taasoo u horseedday haween badan inay guryaha masuuliyaddooda la wareegaan, arrinkan ayaa horseeday in haweenku ay helaan ismaamulitaan iyo madaxbannaani dhaqaale qoyska dhexdiisa.

Sannadihii dhawaa, haweenka qurbo-joogtu waxaa ay ku soo laabanayeen Somaliland, Puntland iyo koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, gaar ahaanna Muqdisho si ay u maalgashadaan waxbarashada, xirfadaha iyo hantidii ay kasoo heleen wadammada reer galbeedka ee bulshadii ay ka yimaadeen. Soo noqoshada haweenka aqoonta leh ayaa dadka qaarkiis u arkaan inay faa'iido u tahay bulshooyinka ku dhaqan deegaannada Soomaalida.

Puntland iyo koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya gaar ahaan, haweenka labada dhinacba waxay dareemayaan in hannaanka siyaasadeed ee haatan jira uusan fa'iido iyaga u lahayn, sababtoo ah waxaa matalidda lagu saleeyay qaab qabiil, mana ahan hab ku dhisan in jagada loo dhiibo qofkii u qalma.

Waxa jirta in ay aad u aaminsanaayeen haweenka siyaasiyiinta caanka ah ee lagu wareystay cilmibaaristan in hogaanka dhaqanka Soomaaliya ay aad ugu badan tahay in ay soo xulaan ragga sababta oo ah waxa ay ka filayaan in ay noqon karaan wakiillo si fiican u meteli kara danaha qabiilka ee baarlamaanada iyo jagooyinka xukuumadda.

***"Haatan waxaa noo jooga jiil dhalinyaro ah oo garanaya kaliya dagaal iyo xagjirnimo. Maanta, waxaa kaloo jira halbegga 4.5 taasoo lagu saleeyo magacaabidda iyo go'aannada siyaasadeed ee la gaarayo. Hadda, hogaamiyayaasha dhaqanka ayaa ogolaansho la waydiistaa si haweenka loogu ogolaado in ay ka qaybgalaan siyaasadda. Hogaamiye dhaqameedka lagama yaabo in uu nin ka doorto gabar xataa hadii ay haysato PhD. Intuu gabar dooran lahaa wuxuu dooranayaa nin aan waxba akhrin waxna qorin."*** - Sidaas waxaa yiri mid ka mid ah gabdhaha u ol-oleeya bulshada rayidka ah oo lixdameeyo jirta, Garoowe, Puntland.

## Heybtu waxa ay saameysaa ka qaybgalka arrimaha bulshada

***"Ma ahan haweenka kaliya kuwa la gacan bidixeeyo. Dadka laga tiro badan yahay xataa waa la cabburiyaa waana la duudsiiyaa xaqooda. Qabiillada laga tiro badan yahay waxa ay ku nool yihiin dhammaan Soomaaliya oo dhan, laakiin codkooda waa la xadaa. Waxaa filayaa inaan isku mid nahay ninka ama gabadha ka timid qabiil tiro badan. Waxaa la ii gacan-bidixeeyay waa maadaama aan ahay haween kana imid ahay qabiil tiro yar."*** - sidaa waxaa yiri siyaasi kontomeeyo jir ah oo joogta Muqdisho.

Haybaha haweenka Soomaalidu waa kuwo kala duwan. Daacad u ahaanshaheeda qabiilka, gobolka ay kasoo jeeddo, amaba ay kamid tahay qurbo joogta ayaa dhammaantood saamayn ku yeelanaya sida ay u qeexayaan amaba u meelmarinayaan ka qaybgalkooda bulsho. Tusaale ahaan, haweenka kasoo jeeda qabiillada laga tiro badanyahay ee la kulma xaq-duudsiinta labada jeer ee dhan haweennimo iyo midda tiro yarida ayaa muhiimadda siiya inay u doodaan xuquuqda dadka laga tiro badan yahay. Haweenka kale ayaa iyaguna doorta inay muujiyaan haybtooda Soomaalinnimo intii ay u doodi lahaayeen haweenka kaliya, iyagoo ka qaybgalkooda arrimaha bulshada ku jeediya dhanka arrimo ballaaran oo khuseeya dhammaan bulshada Soomaalida.

## Gunaanadka

Ka qaybgalka haweenka Soomaaliyeed ee arrimaha bulshada iyo siyaasadda waxaa lagu soo bandhigi karaa siyaabo kala duwan oo waliba ah hannaan rasmi iyo mid aan rasmi ahaynba. Tusaale ahaan, haweenku waxay qoraan sheekooyinkooda iyo ka qaybqaadashadooda taariikhda. Marka ay sidaas samaynayaan, waxay tilmaamayaan ahmiyaddooda hooyo ahaneed, xubinnimadooda bulshada iyo hogaankooda.

Haweenku si mug-wayn ayay uga qayb-qaataan arrimaha bulshada iyo siyaasadda hawlaheeda, laga soo bilaabo qabashada xafiis siyaasadeed ilaa iyo wax ka qabashada iyo u dhaqdhaqaaqidda arrimaha bulshada iyo waxtarka qaraabadooda. Marka aan eegno isbadallada xawliga ku socda ee dhanka bulshada iyo siyaasadda ee deegaannada Soomaalida maanta ka jira, ka qayb-qaadashada haweenka Soomaaliyeed waa mid muhiim u ah horumarinta, boogo dhayidda iyo nabad ku soo dabbaalidda heer walba oo bulshada kamid ah.

Kaalinta haweenka Soomaaliyeed ay bulshada ku leeyihiin waa mid dood badani ka taagantahay. Waa laga reebaa marka ay timaado kaalimaha go'aan qaadshada arrimaha siyaasadda, waana la xaddidaa saamaynta ay ku yeelan karaan siyaasadaha taabanaya bulshadooda. Inkasta oo la qiro kaalinta muhiimka ah ee dhaqaale ahaan haweenku ay ka geystaan qoysaskooda iyo bulshadooda, kaalimahooda kale ee bulshada iyo siyaasadda ayaa aalaaba su'aal laga keenaa amaba la is hortaagaa.

## Talooyin tixgelin mudan

Annaga oo ku salaynayna natiijooyinkeenna hordhaca ah,waxaan u soo jeedinaynaa talooyinkaan soo socda dadka dejiya siyaasadaha iyo kuwa ku hawlan horumarinta iyo isbaddallada siyaasadda.

- Waa in la sameeyo daraasaado badan oo lagu ogaanayo sida haweenka ay xaqooda uga helaan ama ay xilal uga hayaan xafiisyada dawladda (jagooyinka siyaasadeed iyo kuwa shaqada qaranka) dhammaanba dawladaha ka jira deegaannada Soomaalida (Dawlada Federaalka ah ee Soomaaliya, Somaliland iyo dawlad goboleedyada kale ee dalka ka jira).
- Ilaa laga helayo in si caddaalad ah ay haweenku u helaan dad matala – oo ku qotoma sharci ahaan ama is-afgarad Siyaasadeed - waa in la hirgaliyaa nidaamka saamiga kaas oo haweenka loo qoondaynayoo jagooyin siyaasadeed iyo kuwo dhanka shaqada qaranka ah kuwaasoo laga hirgalinayo dhammaan heerarka kala duwan ee dawladeed.
- Haweenka waxbartay, hogaamiyayaasha bulshada rayidka ah, siyaasiyiinta iyo fanaaniinta, gaar ahaan, waa inay tixgalin siiyaan sidii loo gardaadin lahaa haweenkadhalinyarada ah ee deegaannada Soomaalida. Dawladda Soomaaliya waa in ay maal-gelisaa barnaamijyo fududayn kara gacan-qabadka iyo gardaadinta jiilasha hore ay u fidinayaan jiilalka danbe.
- Dawlada Soomaaliya, xarumaha cilmibaarista iyo bulshada rayidka ah waa inay taageeraan hindisayaasha lagu uruurinayo guulihii haweenka ee wakhtiga tagay iyo kan taaganba. Tan waxaa kamid ah aruurin qaab casri ah loogu kaydiyo taariikhda, aruurinta caddaymaha oraahda ah iyo taariikh nololeedkii haweenka Soomaaliyeed iyo in la xuso oo muuqaal ahaan loo beddelo sida filimaan, dukumintari iyo qaab casri ah (digital) oo muuqaal iyo sawirraba wata.

Waxaa qoray Maymuuna Maxamuud oo ah cilmibaare ka tirsan Machadka Heritage. Mashruucaan cilmibaariseed ee labada sano soconaya waa iskaashi labada machad ee PRIO iyo Heritage; waxaana maalgeliyey Guddiga Cilmibaarista ee Norway.

Akhristayaasha waxaa la ogeysiinayaa inay daabici karaan qoraalkan, haddii aaney ka ganacsaneyn. Maadaama uu Machadka Heritage leeyahay xuquuqda qoraalka, waxaa laga codsanayaa ciddii dibu u daabacda inay xusto Heritage, isla markaana Machadka lala soo socodsiiso.

**© Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda. Qoraalkan waxaa lagu daabacay hannaanka Creative Commons Attribution, qaybtiisa aan macaash-doonka aheyn (CC BY-NC 3.0)**